# Dugsiga sare ee waxbarashada dadweynaha - Folkhögskolan

## Waxbarashada Folkhögskolan waxey ka ambaqaadaneysaa ardada baahidooda, aqoontooda hore iyo waayoaragnimadooda. Waxbarashada Folkhögskolan waa bilaash. Dhammaan dugsiyada Folkhögskolan waxaad ...

... KA DHIGAN KARTAA CILMI HEER DUGSI SARE OO AAD KU HELEYSO AQOONSI KUU SAAMAXAYA INAAD KU RAADSATO TACLIIN SARE. DUGSIYADA FOLKHÖGSKOLAN WAA MADAXBANNAAN YIHIIN, KOORASYADA LAGA DHIGAANA WAY KALA DUWAN YIHIIN.

**Kooras guud**

Folkhögskolan waxaa laga dhigaa koorasyo noocyo farobadan oo kala duwan. Kan ugu caadisan waxaa loo yaqaan Kooras guud (Allmän kurs/ Behörighetsgivande kurs), kaas oo aad ka dhigan karto dugsiyada Folkhögskolan dhammaantood. Kooraska guud (Allmän kurs) waxaad ka baran kartaa cilmi heerkiisu yahay dugsi hoose/ dhexe iyo mid sare, waxaadna ka heli kartaa aqoonsi aad ku raadsan karto jaamacad iyo tacliin sare. Waxaad dhiganeysaa maadooyin ay ka mid yihiin iswiidhish, ingriisi, xisaab iyo cilmi bulsho. Kooras guud (Allmän kurs) kama qaadaneysid wax shahaado ah. Oo baddelkeed wuxuu ardayga kooraska ka qeybgalay qaadanayaa qiimeyn waxbarasho oo gaar u ah Folkhögskolan.

**Koorasyo malluug**

Folkhögskolan waxaad sidoo kale ka dhigan kartaa Koorasyo malluug (Profilkurser) halkaas oo aad si qoto dheer leh u dhexgaleyso takhasus gaar ah ee aad xiiseyneyso. Kooras malluug (Profilkurs) wuxuu takhasuskiisu masalan noqon karaa muusig, warbaahin, farshaxan gacan, riwaayadjilid ama luuqad. Koorasyada malluugga kuma heleysid wax aqoonsi ah, kamana qaadaneysid qiimeyn waxbarasho.

**Waxbarasho xirfadeed**

Folkhögskolan waxaa xitaa ka jira waxbarashooyin xirfadeed (yrkesutbildningar) oo badan. Waxaa laga yaabaa in aad dooneyso in aad noqoto suxufi, hoggaamiye maararrow, kaaliye daryeel ama kaaliye shakhsiyeed. Taxa waxbarashooyinka xirfadeed (yrkesutbildningar) ee ka jira dalkan dugsiyadiisa Folkhögskolan intii la doono ayaa la dheereyn karaa.

**Dugsi hooy leh iyo dugsi masaafo**

Qaar badan oo ka mid ah dugsiyada Folkhögskolan waxey leeyihiin hooy ee ay aradadu ku noolaan karto xilliga waxbarashada. Ma kugu adag tahay inaad lafahaaga u tagto Folkhögskolan? Taasi looma baahna inay caqabad kugu noqoto. Waxaa jira koorasyo masaafo (distanskurser) oo farobadan oo aad ka qeybgali karto adiga oo aan goobjoog dugsi ka ahayn.

**Kharash, taageero dhaqaale iyo shuruudaha waxbarashada lagu galo**

Waxbarashada Folkhögskolan waa bilaash. Hase ahaatee waxaad lacag ka bixineysaa buugaagta iyo waxyaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah waxbarashada kooraska. Dugsiyada qaarkood waxey sidoo kale ardada ka qaadaan kharash qado oo khasab ah. Haddii muddada aad waxbaraneyso aad ku jirto hooy dugsigu leeyahay waxaad sidoo kale lacag ka bixineysaa raashin iyo degaan. Waxaa intaa soo raaci kara kharash laga bixinayo booqashooyin iyo safarro aqoonkororsi.

Cid waliba oo ay da'deedu ka weyn tahay 18 jir xaq bay u leedahay inay Folkhögskolan wax ka barato. Mararka qaarkood wey dhacdaa xitaa adigoo da' daadu ay ka yar tahay 18 jir inaad Folkhögskolan wax ka dhigan kareyso. Si ay taasu ku suurowdo waa in degmadaada aad deggan tahay ay lacag ka bixisaa booskaaga waxbarasho.

Waxaa muhiim ah in madaxa lagu hayo in casharada dhammaantood ay ku baxayaan af-iswiidhish. Si aad kooras uga dhigato Folkhögskolan waa in aad ugu yaraan soo dhammeysay Iswiidhishka loogu talogalay soo galootiga (SFI) heerkiisa bilowga ah ama aad leedahay aqoon u dhiganta heerkaas. Waxaa jira koorasyo gaar ah oo loogu talogalay soo galootiga uun ku hadla in yar oo iswiidhish ah. Haddii aad garaneyso iswiidhish filan markiiba waad dhigan kareysaa Kooras guud (Allmän kurs) ama Kooras malluug (Profilkurs).

BOGGA INTERNET EE WWW.FOLKHOGSKOLA.NU WAXAAD KA HELEYSAA WARBIXIN KU SAABSAN DHAMMAAN DUGSIYADA FOLKHÖGSKOLAN EE KU YAAL ISWIIDHAN IYO KOORASYADOODA.

Mar haddii aad tahay arday dhigta Folkhögskolan waxaad taageero dhaqaale ee loogu talogalay ardada ka codsan kartaa Golaha dhexe ee taageerada ardada (CSN).

**www.folkhogskola.nu**

Bogga internet ee www.folkhogskola.nu waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan dhammaan dugsiyada Folkhögskolan ee ku yaal Iswiidhan iyo koorasyadooda.

Ma jirto meel dhexe oo gaar ah oo boos waxbarasho looga dalbado dugsiyada Folkhögskolan. Dugsi waliba isagaa iska mas'uul ah xagga qaadashada ardada, wuxuuna leeyahay foom codsi u gaar ah ee ay tahay in aad adeegsato marka aad dugsiga boos waxbarasho ka codsaneyso. Dugsiyada Folkhögskolan badiidood waxey leeyihiin bogagg internet iyaga u gaar ah halkaas oo aad si toos ah uga codsan karto koorasyadooda kala duwan. Sumado kugu xiriiriya bogagga internet ee dugsiyada waxaad ka heleysaa www.folkhogskola.nu.

**Warbixin guud oo aasaasi ah**

Folkhögskolan waa nidaam waxbarasho oo Iswiidhan ka jiray muddo ka badan 100 sannadood. Waxaa Iswiidhan ka jira 150 dugsi Folkhögskolan. Qiyaastii 110 dugsi oo kuwaa ka mid ah waxey ku xiriiraan ururro bulsho oo kala duwan iyo hay'ado samofal ah. Qiyaastii 40 ka mid ah dugsiyada Folkhögskolan waxay hoos yimaadaan maamulgoboleedyo.

Dugsiyada Folkhögskolan waxaa lagu maalgeliyaa kaalmo dhaqaale ee laga helo dawladda iyo maamulgoboleedyada. Dawladdu waxey kaalmada dhaqaale ee ay ugu deeqdo tacliinta dadweynaha ka leedahay ujeedooyinka soo socda:

- In la taageero hawlgalada xoojinaya oo horumarinaya dimuqraadiyadda,
- In fursad dadka loo siiyo inay ka adkaadaan noloshooda, laguna dhiirrogeliyo inay ka qeybqaataan horumarinta bulshada (iyagoo masalan ka qeybgala hawlaha siyaasadda, ururrada shaqaalaha, dhaqancelinta iyo samofalka),
- In la iskudheellitiro farqiga u dhexeeya heerarka tacliinta dadweynaha oo kor loo qaado heerka waxbarashada iyo aqoonta bulshada,
- In la xoojiyo xiisaha dadweynaha ee hiddaha iyo dhaqanka.

Folkhögskolornas informationstjänst, FIN
**Postadress:** Box 380 74, 100 64 Stockholm **Tel:** 08-796 00 50 **E-post:** info@folkhogskola.nu www.folkhogskola.nu